



muuminka xaalkiisu yaab ayuu leeyahay, arimihiisa oo dhan waa khayr, sidaasina muuminka maahee cid kale uma sugnaan

Suheyb-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu yiri: "muuminka xaalkiisu yaab ayuu leeyahay, arimihiisa oo dhan waa khayr, sidaasina muuminka maahee cid kale uma sugnaan, haduu khayr helo wuu ka mahad celinaya, khayr ayeyna u ahaanaysaa, hadii dhibaato ku dhacdana wuu sabrayaa, khayr ayeyna u noqonaysaa.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Rasuulku-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu la yaabay muuminka arinkiisa iyo axwaashiisa, isagoo-Rasuulku- jeclaysanaya arinkaa, waayo xaalkiisoo dhan baa kheyr wada ah, muuminka maahee cid kale uma sugna arinkaasi, Hadii wax farxad leh uu helo wuu ka mahad celinaya markaasuu mahad celintaas ka helayaa ajar. Hadii dhib ku dhacona wuu ku sabraa oo Ilaahay ayuu ajar ka helayaa, wuxuuna sabirkaa ka helayaa ajar, sidaa awgeed mar walba wuxuu helayaa ajar.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3298>

